# Goorta ay tahay in la Helo Tallaallada, Dhalashada illaa 16 Sano

(Jadwalka Tallaalka Ay Ku Talinayso CDC)

CentraCare

| | Dhalashada | 2 bilood | 4 bilood | 6 bilood | 7 bilood | 8 bilood | 9-10 bilood | 12 bilood | 15 bilood | 18 bilood | 4-6 sanno | 11-12 sanno | 16 sanno |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **RSV antibody** Talaalka Caabuqa Ku Dhaca Unugyada Neef-mareenka (RSV) | Waxay ku xiran taay xaalada talaalka Caabuqa Ku Dhaca Unugyada Neef-mareenka ee hooyada | | | | | Waxay ku xiran tahay xaalada caafimaadka ilmaha | | | | | | | |
| **Hep B** Cagaarshowga B | Hep B | Hep B 1-2 bilood | | Hep B* 6 - 18 bilood | | | | | | | | | |
| **RV** Fayruska Dhiiga | | RV | RV | RV* | | | | | | | | | |
| **DTap** Gowracatada, Xiidheerta, Teetanada | | DTap | DTap | DTap | | | | | DTap 15 - 18 bilood | | DTap | Tdap | |
| **Hib** Haemophilus Influenza Type B | | Hib | Hib* | Hib | | | | Hib 12 - 15 bilood | | | | | |
| **PCV** Bakteeriyaalka Dhiiga | | PCV | PCV | PCV | | | | PCV 12 - 15 bilood | | | | | |
| **IPV** Dabeyl | | IPV | IPV | IPV 6 - 18 bilood | | | | | | | IPV | | |
| **Influenza** Flu | | | | Influenza dayr kasta kadib marka ilmuhu gaaro 6 billood. Labo qiyaas oo Talaal oo loogu talagalay ilmaha | | | | | | | | | |
| **COVID-19** Coronavirus Disease 2019 | | | | COVID-19 | | | | | | | | | |
| **Hep A** Cagaarshowga A | | | | | | | | Hep A 2 marqaadasho oo ugu yaraan 6 bilood u dhaxayso | | | | | |
| **MMR** Jadeeco, Qaamo Bararka, Jadeecada Jarmalka | | | | | | | | | MMR 12 - 15 bilood | | MMR | | |
| **Varicella** Busbuska | | | | | | | | | Varicella 12 - 15 bilood | | Varicella | | |
| **MenACWY** Cudurka Ka Dhasha Bakteeriyada | | | | | | | | | | | | MenACWY | MenACWY |
| **HPV** Caabuqa Keena Burooyinka Jirka | | | | | | | | | | | | HPV** | |

Ilaha xogta: MN Dept. of Health http://www.health.state.mn.us/immunize

**Kala hadal dhakhtarkaaga ama rugtaada caafimaad:**

- Cunugaagu wuxuu dib oga dhacay talaalada laga rabay inuu qaato
- Waxaad leedahay uur waxaadna qabtaa su'aalo
- Cunugaagu wuxuu qabaa xaalad caafimaad oo halis u gelinaysa inuu qaado caabuqa
- Waxaad qabtaa su'aalo ku saabsan talaalada bilaashka ah ama kuwa qiimaha jaban
- Waxaad u baahan tahay nuqulada diiwaanada talaalka cunugaaga

*Tirada marqaadashooyinku waxay ku xiran yihiin waxyaabaha dhaqtarkaaga isticmaalo.

**9-12 sano, 2 qiyaasood oo talaalka HPV ah ayaa loo kala saaray 6 bilood.

Sharciga Minnesota ayaa u baahan caddayn qoran oo laga hayo tallaallada qaarkood ee loogu talagalay carruurta ku jirta xannaanada carruurta, iyo barnaamijyada carruurnimada hore, iyo dugsigaba. Hase yeeshe, haddii u ilmo uu leeyahay sabab caafimaad ama haddii u waalidkiisu/keedu waajib ahaan uga soo horjeedaan midkoodba ama dhammaan tallaaladaba, ka dhaafitaan sharci ah waa la heli karaa.

Tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka talaallada ayaa laga heli karaa Find My Immunization Record (Hel Diiwaanadayda Talaalka) (www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html) ama waxaad wici kartaa Xariirka Xogta Talaalka ee Minnesoto (MIIC) ood ka wacayso 651-201-3980.

# Waa maxay cudurada ay talaaladani ka hortagaan?

| Talaalka-Cudurada Laga Hortagi Karo | | Dhibaatada Ciladaha |
|---|---|---|
| Dhaca Unugyada Neef-mareenka (RSV) | Caabuqa fayraska ee lagu kala qaado neefsashada hargabka ku dhaca sanka, cunaha, iyo mararka qaarkood sambabada; kaas oo ku faafa hawada iyo taabashada tooska ah | Caabuqa sambabada (burukiito) iyo neef-mareenada yaryar ee sambabada; gaar ahaan khatar ku ah dhalaanka iyo caruurta yaryar |
| Cagaarshowga B | Caabuqa fayras faafa ee cagaarshowga oo ku dhaca beerka; kaas oo ku faafa taabashada dheecaanada jirka ee qof cudurka qaba sida dhiiga ama shahwada | Caabuqa beerta ee muddada dheer, beerta oo hawlgab noqda, kansarka beerka, dhimasho |
| Fayruska Dhiiga | Caabuqa fayras faafa ee ku dhaca mindhicirka; oo lagu kala qaado afka oo gacanta la galiyo iyo cuntada urayso | Shuban saa'id ah, jirka oo qalala, dhimasho |
| Gowracatada* | Caabuqa bakteeriyada ee lagu kala qaado neefsashada sanka, cunaha, iyo mararka qaarkood sambabada; oo ku faafa hawada iyo taabashada tooska ah | Murqaha wadnaha oo barara, wadne xanuun, koomo, barataali, dhimasho |
| Xiidheerta*<br>Xiiq-dheer | Caabuqa bakteeriyada ee faafa ee ku dhaca sambabada iyo neef-mareenka; oo ku faafa hawada iyo taabashada tooska ah | Caabuqa ku dhaca sambabada (burukiito), dhimasho; gaar ahaan khatar ku ah dhalaanka |
| Teetanada*<br>Teetano | Caabuqa bakteeriyada ee ku dhaca maskaxda iyo neerfaha oo ay keento kaduudiyaha laga helo carada iyo boorka goob kasta; kuduudiyaha ayaa jirka ka gala meelaha boogaha ah ama maqaarka dilaacsan | Lafo jajab, neef yari, dhimasho |
| Haemophilus influenza type b | Faafida caabuqa bakteeriyada ee ku dhaca sambabada, maskaxda iyo laf-dhabarta, ama wareega dhiiga; oo ku faafa hawada iyo taabashada tooska ah | Waxay ku xiran tahay qaybta jirka ee cudurka ku dhaca, laakiin waxaa kamid noqon kara caabuqa sambabada (burukiitada), dhiiga oo sumooba, caabuqa xuubka maskaxda iyo laf-dhabarta, oo dhimasho keeni kara |
| Bakteeriyaalka Dhiiga | Caabuqyada bakteeriyada ee ku dhaca dhagaha, sanka, sambabada, ama socodka dhiiga; oo ku faafa taabashada tooska ah ee dhibcaha dheecaanada neef-mareenka sida candhuufta ama dhiifka | Bakteeriyada (caabuqa dhiigga), cudurka qoorgooyaha (cudurka daboolka maskaxda iyo xangulada ku dhaca), dhimasho |
| Dabeyl | Caabuqa fayraska faafa ee ku dhaca neerfaha iyo maskaxda; kaas oo afka ku dhaca oo lagu qaado saxaro ku wasakhaysan gacmaha, cuntada ama dareeraha, iyo hawada iyo taabashada tooska ah | Cudurka baralaatiga, dhimasho |
| Hargabka (flu) | Caabuqa fayraska ee lagu kala qaado neefsashada hargabka ku dhaca sanka, cunaha, iyo mararka qaarkood sambabada; kaas oo ku faafa hawada iyo taabashada tooska ah | Caabuqa sambabada (burukiito), caabuqa ku dhaca sanka iyo dhagta, kaas oo ka sii daraya xaaladaha wadnaha ama sambabada hoose, xaaladaha daran ee keeni kara dhimasho |
| COVID-19 | Caabuqa fayraska faafa ee ku dhaca sanka, cunaha, ama sambabada; kaas oo laga yaabo inaad dareento marka uu jiro qabow ama uu ku hayo hargab. Ku faafida hawada iyo taabashada tooska ah | Caabuqa sambabada (burukiitada); xinjirowga dhiiga; dhaawaca beerka, wadnaha ama kelyaha; COVID oo dheeraada; dhimasho |
| Cagaarshowga A | Caabuqa fayras faafa ee ku dhaca beerka; oo lagu faafiyo cunto ama cabitaan wasakhaysan ama xiriir dhow oo lala yeesho qof cudurka qaba | Beerka oo istaaga, dhimasho |
| Jadeeco** | Caabuqa fayraska faafa ee keena qandho sare, qufac, indhaha oo casaan noqda, sanka oo diif ka yimaado, iyo finan; oo ku faafa hawada iyo taabashada tooska ah | Caabuqa maskaxda (bararka maskaxda), oof-wareen (cudur ku dhaca sambabada), dhimasho |
| Qaamo Bararka** | Caabuqa fayraska faafa ee keena qandhada, daalka, dhabanada oo barara, iyo daanka oo barara; waxaa lagu kala qaada hawada iyo taabashada tooska ah | Cudurka Qoorgooyaha (cudur ku dhaca daboolka maskaxda ku wareegsan iyo xangulada laf dhabarta) , caabuqa maskaxda (bararka maskaxda), caabuqa xiniinyaha ama ugxansidaha, dhego la'aan, dhimasho |
| Jadeecada Jarmalka** | Caabuqa fayraska faafa ee keena qandho yar, cune xanuun, iyo finanka; waxaa lagu kala qaada hawada iyo taabashada tooska ah | Aad ayuu halis u yahay haddii uu ku dhaco dumarka uurkaa leh - wuxuu keeni karaa in ilmuhu dhiciso, dhasho asagoon waqtigiisa la gaarin, kasoo hormari waqtii la filayay, ku dhasho cuduro |
| Busbuska | Caabuqa fayraska faafa ee keena qandho, madax xanuun, iyo cuncun, finan dheecaan leh; waxaa lagu kala qaada hawada iyo taabashada tooska ah | Finanka caabuqa, cilada keenta dhiigbax, encephalitis (maskax bararka), oof wareen (cudurkaa sambabada ku dhaca), dhimasho |
| Cudurka ka dhasha bakteeriyada*** | Caabuqa bakteeriyada ee faafa ee ku dhaca xuubka maskaxda iyo laf-dhabarta ama wareegga diigga; waxaa lagu kala qaada hawada iyo taabashada tooska ah | Qalalka gacanta ama lugaha, dhego la'aanta, suuxdin, iyo xitaa dhimashada cudurrada qaarkood |
| Caabuqa keena Burooyinka jirka | Caabuqa ku dhaca sambabada (burukiito), dhimasho; gaar ahaan khatar ku ah dhalaanka | Burooyinka xubinta taranka iyo noocyo badan oo kansar ah oo nolosha danbe ah, oo ay kamid yihiin kansarka ilmo-galeenka, xubinta taranka dumarka, xubinta taranka ragga, dabadda, iyo cunaha |

Ilaha xogta: CDC www.cdc.gov/vaccines/parents

Talaalka * DTaP wuxuu isku daraa ka hortagga cudurka gawracatada, teetanada, iyo , xiiqdheerta. Talaalka MMR** wuxuu isku daraa ka hortaga = jadeeco, qaamo bararka, iyo, jadeeco.
***Caafimaadka Qaangaarnimada: Talaalka Megingococcal ACWY (2 qiyaasood); Talaalka Meningococcal B (2 qiyaasood hadii loo baahdo).

Ilaha xogta: Tixraaca agabyada gaarka ah ee ganacsiga, soo saarayaasha, shirkadaha, ama astaamaha ganacsiga kama dhigna taageerada ama talada Dowladda Mareykanka, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha, ama Xarumaha Xakameynta iyo Kahortagga Cudurrada

5400558SOM_COPY 08/24 ©2023